



## **Ku Dhawaaqista Barnaamijka Baaritaanka Xanuunka COVID-19 ee Dhammaan Qoysaska PPS**

Qoysaska, Ardayda iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee PPS,

Laga bilabao todobaadka soo socda, qoysaska waxaa loo diri doonaa foomka oggolaansha ee ah iinay iska dhaafi karaan inay ka qeybqaataan barnaamijkeena bilaashka ah ee baaritaanka COVID-19, kaasi oo ay iska kaashanayaan Jaamacada Sayniska iyo Caafimaadka Oregon(OHSU) iyo Dugsiyada Dadweynaha Portland. Baaritaanku wuxuu ku siinayaan in hore loo ogaado xanuunka COVID-19, xitaa marka dadka ayna ka muuqan wax calaamadaha u eg xanuunka COVID-19.

Waxaan bilaabi doonaa isdiiwaanglinta hore ee iskuulada todobaadka soo socda, mudnaanta waxaan siin doonaa iskuulada u addeega ardayda K-5 sababtoo ah ardaydaasi wali uma qalmaan inay qaataan tallaalka. Waxaan rajeyneynaa inuu baaritaanku bilaabmo ka dib wax yar marka diiwaangalinta dhammaato maalin kasta iskuulka.

### **Maxay Filan Karaa?**

Halkan hoose waxaa ku qoran iyada oo la soo koobay nidaamka isdiiwaangalinta ardaygaaga ee barnaamijka baaritaanka COVID-19:

1. Qoysaska raba inay ka qeybqaataan barnaamijka baaritaanka waa inay buuxiyaan foomamka oggolaanshaha iyo foomamka awood siinta caafimaadka ee iskuuladu siin doonaan.
2. Iskuul kastaa wuxuu heli doonaa agabka baaritaanka iyo calaamado ardaydu ay keenayaan guriga kuwa raba inayna ka qeybqaadan. Macluumaadka ku saabsan sida loo ururinayo muunada candhuufta waa la siin doonaa ama email ahaan baan loogu soo diri doonaa sidoo kale waxaad ka heli doontaan shabakada OHSU.
3. Ardaygaagu waxaa la siin doonaa qalabka lagu ururiyo muunadaha maalin gaar ah todobaadkii waana inuu ku soo celiyaa maalinta xigta iskuulka. Muunadaha waxaa ururin doonaa kooxda iskuulka oo u qaadi doonaa shaybaarka.

*Tusaale: Ilmahaagu wuxuu guriga keenayaa agabka baaritaanka maalinta Tallaadada marka uu iskuulka ka yimaado. Subaxa Arbacada, adiga iyo ilmahaagu waxaad sameyneysaa baaritaanka, ka dibna wuxuu keenayaa iskuulka. Iskuulka markuu keenayo ilmahaagu wuxuu geyn doonaa meel gaar ah oo loogu talagalay oo ku taala iskuulka. OHSU ayaa qaadi doonto agabka baaritaanka maalinta Arbacada.*

4. OHSU waxaan ka fileynaa inay qoysaska siiso jawaabta 48 saacadood gudahood muunadihii baaritaanka iskuulka la keenay. Waxaa lagu soo diri doonaa email la xafiday oo ka hadlaysa natiijadii ka soo baxday baaritaankii ilmahaaga.

**Haddii ay natiijadu noqoto inuu qabo xanuunka (ama natiijadu ayna dhammeystirneyn), ilmahaaga guriga ayaad ku haysan oo iman maayo iskuulka. Waa in aad soo wacdaa iskuulka ilmahaaga una wargalisaa sida ugu degdeg badan iyada oo aad raaci doonto tilmaamaha lagu siiyey.**

Baaritaanku wuxuu ka mid yahay agabyada faraha badan ee lagaga hortagayo faafitaanka cudurka COVID-19. Marka laga yimaado helitaanka barnaamijka, agabka ugu wanaagsani ee dadku iskaga ilaalin karaan xanuunka COVID-19 waa tallaalka dadka u qalma, in la kala fogaado, maaskarada oo la xirto, inay jiraan hawo mareeno fiican iyo meelaha ay hawadu guryaha ka soo gasho, gacmaha oo la nadiifiyo, iyo guriga la joogo marka la xanuunsan yahay ama aad la kulanto qof qaba xanuunka COVID-19.

Waxaan ku faraxsanhay inaan bilaabno barnaamijka baaritaanka, kaasi oo inaga caawinaya inaan wax badan ka ogaano ku saabsan caafimaadka iyo nabadgelyada ardaydeena.

\*\*\*\*\*

Mashruuca waxaa iska kaashaday Xarunta Ka Hortaga Xanuunada faafa, Hay'ada Caafimaadka Oregon, Waaxda Waxbarashada Oregon, OHSU, Degmada Multnomah iyo Hawladaeena Caafimaadkeena ee MESD>